# Cunnooyinka

**Asal ahaan dhammaan cuntooyinka iyo cabbitaannada**

## way bannaan yihiin oo waa xalaal

waxaan ahayn waxa laga soo reebay oo waxyaalaha xaaraanta ah ee dhibaatada u leh dadka ee waxyeelleynaya qofka caafimaadkiisa iyo debcigiisa iyo diintiisa, wuxuuna Allaah ugu manno sheegtay dadka inuu u abuuray iyaga dhammaan waxa jira dhulka si ay ugu intifaacaan marka laga reebo waxa uu ka xaaraantinimeeyey, wuxuu yiri: **“Waa Isaga Kan idiin abuuray waxa dhulka korkiisa ah oo dhan”**. (Al-Baqarah: 29)

Dhammaan dhirta ay beeraan dadku ama ka soo qaataan geedaha ku yaal miyiga iyo keymaha iyo cowska iyo fidirka nooc ay ahaadaanba **waa xalaal bannaan in la cuno, Marka laga reebo**

**Khamrooyinka iyo alkoolada**

ha laga sameeyo miro sida cinabka ama sareenta ama meeshii laga soo saaraba

**Daroogooyinka**

Meel ay ka soo baxaanba dhir ama kiimiiko

**Allaah wuxuu noo banneeyey**

**Cunista hilbaha xoolaha iyo in lagu intifaaco**

**marka laga soo reebo waxa lagu xaaraantinimeeyey**

**Kitaabka Qur’aanka iyo Sunnada**

## Waxyaalaha xaaraanta ah

| | |
|---|---|
| Doofaarka | Khinziirka: xagga islaamka waa xoolo xaaaraan fadaro ah dhammaan qaybahiisa iyo xubnahiisa iyo waxa laga soo sameeyo sida uu Allaah Kor ahaaye yiri: **“Waxa la idinka xaaraantinimeeyay waa waxaa (xoolahaa) u dhinta iskood (gowrac la’aan), iyo dhiig, iyo hilib doofaar”**. (Al-Maa’idah: 3) |
| Wax kastoo mici leh ee ka mid ah dugaagga | waxaana loola jeedaa dhammaan xoolaha hilibka cuna sida libaaxa iyo shabeelka |
| Wax walba oo ciddi leh oo ka mid ah shimbiraha | waxaana loola jeedaa dhammaan shimbiraha cuna hilibka sida gorgorka iyo galleyrka |
| Cayayaanka | Dhammaan cayayaanka laga helo berriga ma bannaana in la cuno, waxaana laga soo reebaa arrinkaa ayaxa |
| Abeesooyinka iyo jiirarka | Waa xaaraan in la cuno, waxaana nala amray in la dilo |
| Dameerka la dhaqdo | Waana dameerka loo isticmaalo fuulidda iyo in wax lagu qaato |

## Xoolaha bannaan

Waa labo qaybood

### Nooc aan didin

ee la soo qaban karo: kuma bannaana waxaan ahayn **gowrac sharci ah**

**Gowraca sharciga**

Waa gowraca ama bireynta lagu oofsado shuruudda sharciga

**Shuruudda gowraca ee sharciga ah:**

1. Inuu yahay qofka gowracaya qof uu bannaan yahay gowraciisu, waana Muslimka ama kitaabiga (Yuhuudda iyo Kirishtaanka) ee wax kala garan kara oo u qasda gowraca
2. In qalabka wax lagu gowracayo uu yahay mid wax lagu gowrici karo oo af leh oo keeni kara dhiig soo butaaca, waa inuu tahay aalad wax ku goyn karta afkeeda sida middida
3. Inuu ku xuso Magaca Allaah, isagoo dhahaya (Bismillaah) marka uu dhaqaajinayo gacantiisa si uu u gowraco.
4. Goynta waxa waajibka ah in la gooyo marka la gowracayo: waana mergiga iyo dhuunta iyo labada xidid ee waaweyn ee ku yaal qoorta ama seddex ka mid ah afartaasi.

### Qayb ku nool berriyada

Oo ka carara dadka, aan la qaban karin si loo gowraco. Marka waxaa bannaan in lagu soo ugaadho si sharci ah

**Waxaana loo shardiyaa ugaarashada shuruud ay ka mid tahay:**

1. In qofka ugaaranaya uu yahay caaqil doonaya ugaarasho ha ahaado Muslim ama Kitaabi, oo ma bannaana waxa uu soo ugaarto sanam caabude ama qof waalan.
2. Inuu yahay xoolo aan la awoodin gowracooda didkiisa darteed iyo fogaanshahiisa, haddiise la awoodo in la gowraco sida digaagga iyo ariga iyo lo’da markaa ma bannaana ugaarashadiisa.
3. Inuu yahay qalabka lagu dilayo mid af leh sida gamuunka iyo rasaasta, iwm, ama uu yahay xoolaha loo adeegsaday ugaadha sida eyga ama galleyrka mid la baray oo tababaran oo u hoggaansama hadduu amro oo ka jooga hadduu ka reebo
4. Inuu ku xuso Magaca Allaah oo yiraado: “Bismillaah” inta uusan dirin qalabka ama eyga lagu ugaadho
5. Hadduu haleelo xayawaanka ama shimbirka kaddib ugaarashadiisa oo helo isagoo nool aan dhiman waxaa waajib ah in la bireeyo oo gawraco.

## Burcadda caanaha (Jubnada_Cheese)

Isuma beddelaan caanaha burcad (jubno) haddaan lagu darin khamiirad ka yeesha inay kacaan oo isu beddelaan burcad (jubno), waxaana lagala soo baxaa walaxdaa lagu khamiiriyo caloosha xoolaha naas nuugga ah sida dibiyada yar iwm waxaana la yiraahdaa infaxo (Rennet_enzyme)

1. Jubnada loo adeegsado infaxada xoolo ay gowraceen Muslim ama ehlu kitaab way bannaan tahay oo waa la isku raacsan yahay.
2. Jubnada (cheeska) loo adeegsado infaxo (Rennet_enzyme) xoolo baqtiyey way bannaan tahay waa qowlka ugu saxsan ee sheegeen culumadu.
3. Jubnada (cheeska) se ee loo adeegsaday infaxada (Rennet_enzyme) khinziirka waa xaaraan najaaso ah, waayo infaxa (Rennet_enzyme) doofaar waa xaaraan najaaso ah.

## Cuntada Yuhuudda

כשר KOSHER

Kuusharka

Macnaha Kuushar ay qoraan Yuhuudda, waa in cuntadaa lagu qoray ereygaa ay waafaqsan tahay xeerarka cuntada ee la cuni karo xagga shariicada Yuhuudda.

Dhammaan cuntooyinka ay xalaalsadaan Yuhuuda waa noo xalaal innagana xagga shareecaddayada, mana jiraan wax laga soo reebo arrinkaa – inta aan ognahay – aan ahayn khmarada oo keliya ay kala saaraan.

Sidaa awgeed, waxaa u bannaan qofka Muslimka ah inuu cuno cuntadooda haddii uu ogaado inay ka mran yihiin alkoolada, waxaase la gudboon inuu raadsado xalaasha oo dadka weydiiyo si loogu fidiyo arrinka xalaasha bulshada

## Qaybaha hilbaha

حلال QUALITY HALAL PRODUCT

Mqaayadaha iyo dukaammada

1. Waxa uu ku gowraco qofka Muslimka ama Kitaabiga si sharciga waafaqsan, kaasi waa bannaan yahay sida laysku raacsan yahay
2. Waxa uu u gowracay qofka Muslimka ama Kitaabiga ah (Yuhuudka ama Kirishtaanka) si aan sharciga waafaqsanayn. sida qabasho koronto ama qarqin, kaasi waa xaaraan la hubo
3. Waxa uu gowrcao qof aan Muslim ahayn iyo Kitaabi (Yuhuud ama Kirishtaan) sida xoolaha ay gowracaan buudiyiinta iyo Hindooska iyo dadka aan diin heysan kuwaasi waa xaaraan, waxaana soo galaya hilibka laga helo maqaayadaha iyo dukaammada dalalka badi dadkeedu yihiin kuwo aan ahayn Muslimiin ama ehlu Kitaab, xukunkiisu waa xaaraan ilaa ay noo caddaato in si sharci ah loo gowracay.
4. Waxa uu gowrcay qofka Kitaabiga ah aan la ogeyn xaalka iyo sida loo gowracay iyo sidoo kale waxa laga helo maqaayadahooda iyo dukaammadooda, asal ahaan : waa inay ka mid yihiin xoolaha ay gowracdeen wayna bannaan tahay in la cuno, waa se in lagu dadaalo in lagu xuso Magaca Allaah marka la cunayo oo la yiraahdo Bismillaah, inkastoo sida habboon ay tahay in la raadsado hilibka xalaasha ah ee aan wax shaki ah ku jirin xalaalnimadooda

## Xoolaha berri iyo bad ku noolka ah

Culimadu way isku khilaafeen xoolaha berri iyo bad ku noolka ah, ma waxaa la raaciyaa xoolaha ku nool berriga mise badda xagga xeerar sharciga, qaarkood waxay yiraahdeen waxaa la raaciyaa xoolaha bad ku noolka ah, sidaas awgeed way bannaan yihiin dhammaan noocyadooda ha noolaadeen ama baqti ha ahaadeen haddanay dhibaato lahayn.

Qaar kalena waxay yiraahdeen waxaa la raaciyaa xoolaha berri ku noolka ah, waxayna la xeer yihiin xoolaha berriga, marka ma bannaana waxoodii mici leh iwm, waana in la gowraco wixii la gowrici karo, oo la ugaadho midda didda oo cararta, mana bannaana meydkooda waana sida xigta diin dhowrsiga.

## Cuntooyinka lagala soo baxo badda

Waxaa loola jeedaa dhirta ama kalluunka ama xoolaha aan ku noolaan karin waxaan ahayn badda, oo ku noolaanshahiisa berriga yahay waxaan caadi ahayn

**way bannaan tahay in la cuno**

**haddii aanaay dhibaato u lahayn caafimaadka.**

Allaah kor ahaaye wuxuu yiri: **“Waxaa la idiin banneeyey ugaadha badda aad ugaarsataan iyo cunnadeedaba”** (Al-Maa’idah: 96)

Ugaadhna waa waxa laga soo baxo badda isagoo nool, cuntada baddana waa waxa badda soo tuurto kaddib dhimashadiisa

Waxaa loola jeedaa badda biyaha badan, sidaas awgeed waxaa soo galaya webiyada iyo balliyada, iyo qeyrkood ee ah biyo badan

Farsamda
Xasan Baa Haaruun

Waxaa laga soo qaatay Kitaabka
**Muslimka Hagaha Fudud**
w.w. Fahad Baa Hammaam

Mashruuca NEW MUSLIM GUIDE

Waxaa soo saaray MODERN GUIDE